

**DUUFAANAHA JIILAALKA**

Duufaanta Jiilaalka waxay u kala baxdo min baraf xoogaa ah oo dhaca dhawr saacadood ilaa xaalad barafeed karar ah oo wadata baraf dadka cawara oo dabaylo wata oo socda ilaa iyo maalmo dhawr ah. In badanoo duufaanta Jiilaalka ka mid ah ayaa waxaa wehliya heerkullo hoose iyo baraf culus oo dhaca oo six un u yareeya muuqaalka.

Qaar ka mida duufaanta Jiilaalku ay aad u weyn yihiin oo markaa ay samayn karayaan dhawr Gobol, meesha ay kuwa kale hal mujtamac ah saamayn karaan.

Duufaan Jiilaalyada magacyo kala duwan ay ugu yeeraan qaybaha kala duwan ee dalka. Ku tirtirsii ka qaybgalayaasha in ay soo eegaan xafiiskooda maxalliga ah ee xarunta maaraynta cimilada, xafiiska Adeegga Qaranka ee Cimilada ( National Weather Service (NWS) ama laanta maxalliga ah Laanqayrta Cas ee Maraykanka si ay u helaan eray bixinnada degaankooda u gaarka ah.

Duufaan Jiilaalyada waxaa loo tixgeliyaa in ay yihiin dilaa khaa'in ah, maxaa wacay inta badan geeridu si dadban bay ula xiriirtaa duufaanta. Isticmaal muuqaalka si aad uga hadasho khataraha ay nafta dadka ku keenaan duufaan barafeedyada.

- Shil baabuur/gaadiid kale: Tani waa sababta ugu badan ee dhimasho inta lagu jiro duufaan Jiilaalyada.
- Shil baabuur/gaadiid kale: Iyadoo ay saxmaddu keento, kuwani waa labada ugu badan ee ay suurowdo in ay sababaan dhimashooyinka ku tacalluqa duufaan Jiilaalyada.
- Barafoow/sumoobid: Dadka gabowga ahaa ugu badan dhibbanayaasha barafowga. Maraykan badan oo gabow ahaa run ahaan xargaga oo qabow ugu dhinta guryahooda marka ay heerkul hoose oo khatar ah gudaha ugu bandhigmaan, ama way sumoobaan markay shidalal si khaldan sida dhuxul dhagaxa oo dhalisa kaarboon monksaydh u isticmaalaan si ay isu diiriyaan.
- Dab guryaha ka dhaca: Kuwani inta badan waxay dhacaan Jiilaalka waxaana u sabab ah taxaddar fiican oo aan la samayn marka la isticmaalayo ilo kululayneed silloon (dab aan la dhawrayn, dambaska oo waqti hore la soo daadsho, kululeeyayaasha oo la dhigo bed aan habboonayn, iwm.) Dabka hulaaqa inta lagu jiro duufaan Jiilaalku aad buu khatar u yahay, waayo, waxaa laga yaabaa in ay biyuhuba xargagaan, oo ay markaa adkaato in qalabka badka lagula diriyo ay gaaraan meeshii dabka.

---

**KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA**  
**LIFAAQA 1-A: QORSHEYAASHA CASHARRADA KHATARTA**

---

**DUUFAANNADA JIILAALKA (WELI SOCOTA)**

Waxyaabaha ay ka Kooban tahay Duufaan Jiilaashu

- Baraf dhaca culus
- Baraf
- Daad Jiilaal
- Qabow

**BARAF DHACA OO CULUS**

Baraf dhaca oo culus wuxuu:

- Joojin karaa dhaqdhaqaaqa gobollada magaalooyinkana wuu curyaamin karaa.
- Joojin karaa gaari raacayaasha.
- Xiri karaa madhaarrada.
- Khashkhashi karaa adeegyada caafimaadka iyo xaaladda degdegga ah.

Ku ururidda baraf ee saqafyada dushooda uu dumin karo markaana uu geedaha iyo baallooyinka korantadaba dumin karo. Guryaha iyo beeraha ayaa go'doonsanaan kara maalmo, xoolaha aan xafidnayna way lumi karayaan. Qiimaha xaaqidda barafka iyo dayactirka dhibtuu geystay iyo meheradaha uu lumiyo ayaa saamayn kharaar ku yeelan karta magaalooyinka iyo beldaanta.

Buuraha barafka culus ee ka soo daata uu noqdo baraf guuraya oo loo yaqaan “avalanches” barafguur. In ka badan 80% oo ah barafguuryada dhaca Jiilaalka dhexdiisa ayaa waxaa sababa ururid degdeg ah oo uu barafku ururo, 90% kuwaa ka mid uhuna waxay dhacaan 24 saacadood gudahood markii uu baraf da'o.

Barafguuku wuxuu gaari karo xaddiga milyan tan, uuna ku socon karo xawaare 200 mayl saacaddiiba (mph) ah.

### DUUFAANNADA JIILAALKA (WELI SOCOTA)

Noocyada kala duwan ee Barafka Daata waxaa ka mid ah

- Bilisarka waxaa la socda dabayl xawligeedu yahay 35 mph ama ka badan oo wadata baraf dabayleed, oo aragga ku koobi rubuc mayl in ka yar ila ugu yaraan 3 saacadood.
- Baraf dabayleed waa baraf dhaca oo ay dabayshu waddo oo araggana soo yareeya. Baraf dabayleedku wuxuu noqon karaa baraf daadanaya/ama baraf dhulka yiillay oo ay dabayshu xambaarayso.
- Baraf karareed waa xagaayo baraf xooggan oo kooban oo ay la socdaan dabaylo aad u dheereeya. Ururiddisana way weynaan kartaa.
- Baraf xagaayo ah waa baraf dhacaya oo si kala duwan waqti kooban u di'i oo aan ururin ama ururkiisu yar yahay.

### BARAF

Ururid badan oo baraf ah ay maalmo khashkhashi karto warisgaarsiinta iyo korantada inta ay shirkadaha qalabka korantada dayactirayaan dhaawaca ballaaran. Xitaa urur yar oo baraf ah ayaa khatar ugu filan wadayaasha iyo lugeeyayaasha. Buundooyinka iyo biriishyada ayaa gaar u khatar badan waayo waxay barafobaan oogada kale ee dhulka ka hor.

Noocyada kala duwan ee barafka waa:

- Xargag: Dhibicda oo xargagta noqotana malxaafyo baraf ah intaanay gaarin dhulka ayaa la yiraa xargag (sleet.) Xargaggu inta badan wuu soo boodaa markuu oogada ku dhaco oo walxaha kuma dhego. Xargagguse waa uu ururi karaa sida barafka khatarna waa ku keeni karaa wadayaasha.
- Roob dheggan: Roob isagoo heerkulkiisu ka hooseeyo kan barafowga dhulka ku soo da'a – oo sababa inuu ku dhego oogada ayaa la yiraa roob dheggan. Xitaa qaddar yar oo baraf ururay ahaa sababi kara khatar baaxad leh
- Duufaan barafeed: Duufaan barafeedyadu waxay dhacaan marka uu roob dheggan da'o oo uu markiiba sii dhego. Warisgaarsiinta iyo korantada ayaa kharribnaan karta maalmo.

### **DUUFAANNADA JIILAALKA (WELI SOCOTA)**

#### **DAAD JIILAALYADA**

Duufaan Jiilaalyadu waxay sababi karaan daadad, sabab u noqda hanti badan oo lunta iyo geeri.

Daadadka Jiilaalku waxaa ku jira:

- Duufaan xeebeedyo: Dabaylaha ka dhasha duufaan Jiilaalyada xaddiga sare waxay sababi karaan daadad hirar leh oo baahsan iyo nabaad guur xeebta ka dhaca meelaha xeebaha leh.
- Saxmad barafeed: Xilliyada dheeraada ee qabow waxay xargajiyaan webiyada iyo dooxooyinka. Heerka biyaha oo kaca, ama mimidda waxay barafka u jejebisaa cadad waaweyn oo cuba meelaha la xiray ee dabiiciga iyo dad-sameega ahba. Cubid barafeed ayaa sidii biya xireen inta noqota, markaa sababi karta daadad aad u daran.
- Baraf dhalaala: Milmidda degdegga ah ee gebiyo baraf ah oo culusi waxay keeni karaan daadad.

#### **DHAXAN**

U feydnaanta (hu' la'aan) dhaxantu waxay keeni kartaa jarrariso iyo barafow markaa nafta halis ku ah. Dhallaanka iyo waayeelka ayaa aad loogu baqaa.

Waxa la oran karo qabow xad dhaaf ah ay ku kala duwan yihiin qaybaha kala duwan ee dalka:

- Koonfurta, heerkullada u dhaw xargagga ayaa loo yaqaan dhaxan. Daaqa ayaa dhaawacmi kara tuubbooyinkuna way xargagi karaan ama dalooshami karaan.
- Waqooyiga, heerkullada xad-dhaafka ahu waa intii loo gaaro eber ka hoose.

Marka aad ka hadlayso dhaxan, waa in aad tixgelisaa:

- Neecaw qadhqadh: Neecaw qadhqadh maaha heerkulka dhabta ah, waxse ay tahay sida uu maqaar qaawani u dareemi karo dabaysha iyo qabowga. Marka ay dabayshu badataba, kulayl ayaa si xawli ah looga qaadaa jirka, kaas oo hoos u wadaaya heerkulka jirka.
- Tarrarid: Tarrarid waa dhaawac gaara tifafyada jirka oo uu keeno qabow xad-dhaaf ah oo natiijaduna ay tahay dareenka oo luma iyo muuqaallo cad-cad oo darfa xubnaha uga yaalla, sida faraha, faraha lugaha, dacallada dhegta, ama caaradda sanko. Dhibbanayaasha tarrarku waxay u baahan yihiin daaweyn degdeg ah. Hadday tahay inaad caawin sugto, si tartiib ah dib ugu diiri meelaha ay wax gaareen. Haddii ay calaamado barafobid muuqdaan, markaa diiri bu'da jirka darfa ka hore.

**DUUFAANNADA JIILAALKA (WELI SOCOTA)**

- **Barafoobid:** Barafoobid waxay dhacdaa marka uu herkulka jirku hoos uga dhaco 95 digrii oo Feeranhayt ah. Barafoobiddu wax bay dili kartaa. Dadkase ka kaca, waxaa badanaa ku dhaca xanuun jiidama oo kelyaha, beerka, iyo baankariyaska ah. Haddii aad ka shakido barafoobid, qaad heerkulka dhibbanaha. Hadduu ka hooseeyo 95 digrii Feeranhayt, markiiba daryeel dawo doono! Haddii aanu jirin daryeel dawo, tartiib qofka u diiri, adigoo bu'da jirka ka billaabaya. Kululaynta gacmaha iyo lugaha marka hore waxay dhiiggii qaboobaa u kaxayn kartaa dhinaca wadnaha, waxaanay keeni kartaa wadne istaag. Ugu labbis qofka dhar qallalan ama ku duub buste diirran, adigoo luqunta iyo madaxa dedaaya. Ha siin aalkole, daroogo, kafee, ama wax sideedaba sharaab ama cunto kulul ah. Fuud diirran ayaa ah cuntada ugu horraysa oo la siiyo.

Calaamadaha digniinta ee barafoobidda waxaa ka mid ah:

- Gariir aan la xakamayn karin.
- Xusuus lumin.
- Wareersanaan.
- Kala-hadal.
- Hadal sirgaxan.
- Dawakhsanaan.
- Daal muuqanaya.

Adeegga Cimilada ee Qaranka, Xarunta Saadaalinta Duufaantu ayaa soo saarta lana socota digniino ku saabsan cimilo khatar leh, oo ay ku jiraan duufaan Jiilaalyada.

Tillaabooyinka muhiimka ah ee u diyaarsanaanta duufaan Jiilaalka:

- **Faham khatarta.** Waqti geli inaad fahamto khatarta duufaan barafeedka ee aaggaaga.
- **Diyaari hoygaaga** ado isticmali asturid, ningixid, iyo xanjayn. Baro sida tuubbooyinka looga ilaaliyo in ay xargagaan iyo sida loo milo tuubbo xargagsan. Kaydso shidaal (ama qalabka kululaynta xaaladda degdegga ah) oo kugu filan. Dabaq kasta oo hoygaaga ah ku rakib oo tijaabi dawan qaaca.
- **Dayactir qalabka baraf xaaqidda** intaan la gaarin xilliga duufaan Jiilaalka. Ha kuu ahaado qalabku mid xaalad uu ku shaqayn karo ah, hubina in aad haysato sahay gaas ah oo kugu filan.
- **Ha kuugu buuxsanaato haanta shidaalka ee gaarigaaga** isticmaalid xaalad degdeg ah, kana dhawr tuubbada shidaalku in ay xargagto.
- **La soco digniinaha.** Istimaal raadiyaha cimilada ee NOAA oo leh wajhad uu ku sheego jabaq digniineed ama ka dhegayso raadiyaha maxalliga ah baahinta EAS.
- **Gudaha guriga joog, dhar diirranna xiro.** Iska dul gasho dhar aan kaa weyneyn oo fudud oo diirran. Markay muhim tahay, qaar iska sib si aadan u dhididin oo aanad hadhowna u qarqarin.

**DUUFAANNADA JIILAALKA (WELI SOCOTA)**

- Cun oo cab sidii caadiga kuu ahayd. Cuntadu waxay jirka siisaa tamar uu ku samaysto kulkiisa. Cab hoorarka sida fuud diirran iyo juus si aad isaga dhawrto fuuqbax. Ka fogow kafeyn iyo aalkole. Kafeyn, istiimiye weeye wuxuuna sii badiyaa astaamaha barafowga. Aalkole waa dejiye wuxuuna dedejiyaa saamaynta uu qabowgu jirka ku yeesho. Aalkole wuxuu sidoo kale hoos u dhigaa wareegga dhiigga waxaanu kaa dhigi karaa mid aan aad u ogeyn saamaynta dhaxanta. Kafeyn iyo aalkole labaduba fuuqbax bay sababi karaan.
- Kaydi shidaal. Aad baa loogu baahan karaa korantada, gaaska, iyo hababka kale ee qaybinta shidaalka ah (shidaalka saliidda, gaaska, iwm.). Qaybiyeyaashu waxaysan awoodi karayn in ay sahay cusub helaan marka lagu jiro cimilo ba'an. Termostatka ka dhig 65 digrii Feeranhayt maalintii iyo 55 digrii habeenkii. Xir qolalka aan la isticmaalin, tuwaallo iyo milifyo ku cub baqbaqa albaabbada hoostooda ah, daaqadahana xir habeenkii.
- Haddaad dibedda joogto, naftaada ka dhawr khataraha. Dhar diirran xiro, qallalnow, iskana eeg calaamado barafow iyo tarrar ah. Ka dheerow isdirqinta. Taxaddar ugu soco jidadka barafka leh, isticmaalna gaadiidka dadweynaha, haddii ay suurowdo.

Sidoo kale taxaddar is ilaalin samee haddii ay khasab tahay in ay duufaan Jiilaalka gaari ku waddo:

- Jiilaalka u diyaari gaarigaaga ka hor xilliga duufaan Jiilaalka. Makaanig ha eego habka gaarigaaga, oo kuna xiro shaagag xanaf ku filan leh oo aad Jiilaalka ku dhaafto. Qalabka xaaqidda barafyada ha kuugu jireen gaariga.
- Hayso telefoonka gacanta ama raadiyaha laba-oondaalaha ah markaad ku safraysid duufaan barafeed. Hubi in bateriyadu uu danab ka buuxo.
- Ku hayso guntin sahay musiibo ah gaari kasta oo xubnaha qoysku ay isticmaalaan qaybtiisa dambe.
- Si taxaddar leh u qorshayso safarrada dhaadheer una sheeg gof kale meesha aad u socoto, marinkaga, iyo waqtiga aad bu began tahay inaad gaarto.
- Haddii aad xannibanto, gaariga ha ka tegin, muuji calaamad dhibaato, marmarna kici gaariga si uu u diirranaado, adigoo iskaamiindada ka dhawri in uu baraf galo, qun yar u fur saqafadda si ay u leedhsato. U isticmal wixii aad heli karaysid oo joornaallo, maabab, iyo dermaha gaariga ee la qaadi karo madhxin dheeraad ah. Ka fogow isdirqin, cab dareere ama hoor oo iska eeg calaamado barafow iyo tarrar.

Saadaasha eeg inta aadan bannaanka u boodin. Duufaan Jiilaalyada waaweyn waxaa inta badan daba socda heerkullo kaba sii qabow.